



Barafka hore ee ugu yaraan hal saadaal, waqti xasuusin ah oo ku saabsan sida looga warhayo

Khabiirka saadaasha hawada Rod Hill ee KGW ayaa dhowaan soo [saaray saadaasha jiilaalka](#) oo saadaalinaysa 8 illaa 10 inji oo baraf ah, oo ay ku jirto suurogalnimada in baraf hore uu dhaco Nofambar ama Dhisembar. Haddii taasi u muuqato inay sax tahayd, waxay kadhigantahay inuu dhici doono baraf hore oo ka badan kii sanad dugsiyeedkii hore, markaasoo cimiladayada ugu horreysay ee sababay carqaladeynta jadwalka fasalka caadiga aysan imaanin illaa 5 Febaraayo .

Si kasta oo ay ahaato saxnimada saadaasha, waxay umuuqataa inay tahay waqti fiican oo dib loogu cusbooneysiinayo bulshada Dugsiyadda dadweynaha ee Portland oo ku saabsan sida aan kugu ogeysiinayo xiritaanada dugsiya iyo daahitaanka ay keentay cimilada, ama xaaladaha degdegga ah ee dugsiya ama dhacdooyinka kale ee gaarka ah. Waa kuwan qaabab aan kuugu soo gudbinno macluumaadkaas:

Farriin qaadaha Dugsiya: Waxaad ka heli kartaa farriimaha qoraalka ah iyo wicitaan taleefoon ood ka hesho taleefankaaga gacanta khabar muhiim ah iyo wargalin. Qor "YES" ("Haa") ama "Y" adigoo kudirayo 68453.

Bogga: Boggeena, www.pps.net, wuxuu lahaan doonaa wargalin deg deg ah. Ka eeg khadka jaalaha ah dusha sare ee bogga shaashada markii ay jirto xaalad degdeg ah ama xiritaanka laxiriira cimilada.

Twitter: Waxaan soo dhignaa isgaarsiin deg deg ah aaladdan warbaahinta ee bulshada. Si fudud [u raac koontayada](#) si aad u hesho khabar.

Facebook: Waxaan sidoo kale gelinaa isgaarsiin deg deg ah Facebooga. "like" saar [koontayada](#) si aad u hesho wararka waqtigaaga.

Wicitaanada taleefanka: Wicitaanada iswada ayaa u taga lambarrada koowaad ee foomka diiwaangelinta ardayda oo ku qoran dhammaan luqadaha la taageerayo. Xusuusnow inaad cusboonaysiiso macluumaadka la xiriirka dugsiyaaga haddii lambarka taleefankaagu isbeddelo.

Go'aannada ku saabsan xirida sababaha la xiriira cimilada iyo dib-u-dhaca ayaa la sameeyaa ka dib markii shaqaalaha gaadiidka ee PPS ay shaqsiyan kormeeraan wadooyinka laga bilaabo 2:30 a.m., iyo wadatashi lala yeesho koox badan oo khabaro ah iyo hoggaamiyeyaal degmo. Ka aqri faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan geedisocodka nidaamka [sheekada PPS laga bilaabo Maarso](#).